Qofka salaad ilaawa ha tukado markuu xasuusto, kafaaro gud kale malaha oo intaa ahayn

Anas Binu Maalik Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Qofka salaad ilaawa ha tukado markuu xasuusto, kafaaro gud kale malaha oo intaa ahayn: {salaada u oog xuskayga} [suuratu Daaha:14]".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey Qofka ilaawa Salaad faral ah ee waqtigeedii baxay, waxaa ku waajib ah inuu u deg-dego qalaynteeda marka uu xasuusto, dambiga ka tagida Salaada laga dhaafimaayo oo Ilaahay ma asturayo in Muslimku uu tukado markuu xasuusto maahee, Ilaahay ayaa Kitaabkiisa ku yiri: {Salaada u oog xuskayga dartii} [suuratu: daaha:14], oog oo tuko Salaada aad ilawdo markaad xasuusato.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65088